**UNHCR**
The UN Refugee Agency

# Kusoo Dhawoow Slovakia

## Ma tahay qof ka yar da'da 18 sano oo hadda yimiday Slovakia?



## HALKAN WAXAAD KA HELI KARTAA MACLUUMAAD FAA'IDO KUU LEH

## Halkee ayaan hadda ku suganahay?

**Salaam! Waxaad joogtaa Slovakia.**

Slovakia waxay ku taalaa Badhtamaha Yurub oo waxa xubin ka yahay Midawga Yurub. Waxay xuduud la leedahay Hungary, Austria, the Czech Republic, Poland, iyo Ukraine, dhammaan dalalkani waxay xubno ka yihiin Midawga Yurub. Tani waxay la macno tahay inay leeyihiin shuruuc isku mid ah. Austria iyo Slovakia waxay isticmaalaan isku lacag si lamid ah sida xubnaha kale ee Midawga Yurub, taasoo ah Euro. Caasimada Slovakia waa Bratislava. Luuqadda dhaladka ah waa Slovak, in badan oo dadka dalkaasi waxay ku hadlaan af Jarmal iyo Ingiriisi.




## Yaa loo tixgalinayaa in uu carruur yahay marka la joogo Slovakia?

**Waxa loo tixgalin doonaa carruur ilaa iyo inta uu ka gaadhayo da'da18.**

Slovakia iyo Midawga Yurub, waxa loo tixgalin doonaa ilaa iyo inta uu ka gaadhayo da'da 18. **Dhammaan carruurta waa la ilaalinayaa iyadoo aan loo eegayn dhalashada halka uu kasoo jeedo ama xaalada dhalashada sharci.**

**Haddii aad tahay ilmo socdaalaya adiga oo aan waalidkaa kula socon, waxaad xaq u leedahay ilaalin gaar ah intaad joogto Slovakia** iyadoo loo marayo maamulka Ilaalinta Ilmaha. Daryeelka gaarka ah ee lagu caawinayo carruurta socdaalaysa ama joogaya Slovakia iyadoo aanay la socon waalidkooda/daryeel bixiyaashooda.

## Waa maxay xuquuqaha ay leeyihiin carruurta ku nool Slovakia ?

Dhammaan carruurta, iyadoon loo eegayn halka ay kasoo jeedaan ama xaalada sharci, waxay leeyihiin xuquuqo kala duwan, sida kuwa la xidhiidha deegaanka qoyska iyo daryeelka ilmaha, caafimaadka iyo caydha, waxbarashada, wakhtiga faakihaysiga iyo dhaqanka, iyo tallaabooyinka daryeelka gaarka ah ee uu dammaanad qaaday Axdi-qarameedka Xuquuqda Ilmaha ee Qaramada Midoobay kaasoo ay ansixisay Slovakia.

**Si aad ugu raaxaysato xuquuqaha, waxaad u baahan tahay inaad ku wargaliso maamulka,** iyo haayadaha caalamiga **ah inaad tahay ilmo ka yar 18 sano jir.** Haddii aad hayso dhokumanti caddaynaya da'da, usoo jeedi maamulka. Xasuusnow inaad ilaaliso dhokumantiyadaada! Lama ogola in xubin ka tirsan qoyskaaga uu kaa qaado, marka laga reebo ilaalada xuduudaha ama booliiska kuwaasoo u baahan inay kaa hubiyaan muddo gaaban intaanad iyaga kusoo noqon. Haddii aanad haysan dhokumantiyada noocaas ah, waxaad u sheegi kartaa maamulka inta ay tahay da'daadu. Haddii maamulku aanay hubin da'daada, waxay samayn karaan waxoogay qiimeyn ah.



Haddii aanad ku hadal Slovak, waxaad xaq u leedahay inaad codsato turjumaan si ay kaaga caawiyaan xidhiidhista dhinaca luuqadda aad ku hadasho marka loo baahan yahay dhammaan heearka kala duwan.

# Maxaa ku dhaca carruurta socdaalaysa iyagoon waalidkood la socon?

Carruurta socdaalaya iyagoon waalidkood la socon waxay yeelan doonaan xaalado gaar ah; haddii arrintani ay tahay kiiskaaga, maamulka daryeelka ilmaha ee ku hadla Slovak ayaa qaadanaya masuuliyada inay ku ilaaliyaan adiga iyo inay hubiyaan inaad jidh ahaan iyo maskax ahaanbad badqabto ("waxa ugu fiican ee aad rabto") waa muhiimada koowaad. Tani waxayy ka dhigan tahay in dhammaan tallaaboyinka ku saamaynayaan, haddii ay ku qaado dawlada ama cid gaar ahiba, **waxaad doonayso waa in uu noqda waxa asaasiga ah ee laga fikirayo**. Haddii aanad la socdaalayn waalidkaa, laakiin ay kula socdaan qaraabo kale oo ku xanaanayn kara, maamulka daryeelka carruurta ee Slovak wuxuu la shaqayn doonaa qaraabadaada siu uga hadlo arrinka dhokumantiga sharciga ah, si loo ansixiyo nidaaminta daryeelka iyo masuuliyada si uu kuu xanaaneeyo intaad ku sugan tahay Slovakia. **Haddii aad kaligaa socdaalayso, iyadoo aanay kula socon waalid iyo qaraabo toona**, maamulka daryeelka carruurta Slovak wuxuu ku geyn doonaa Xarunta Qoysaska iyo Carruurta si loo hubiyo badqabkaaga, halkaasoo ay joogaan khubaro dhinaca daryeelka carruurta kuwaasoo kaa noqon doona masuul.



# Waa maxay micnaha "masuul"?

Masuulku waa shaqsi ka masuul ah in uu ilaaliyo danahaaga marka aanay waalidkaa joogin. Qofkani sharci ahaan isagaa kaa masuul ah oo wuu ka matali doonaa markaad la xaajoonayso maamulka Slovakia. **Waxaad WALI haysataa XUQUUQDA ah inaad sharaxdo fekerkaaga iyo waxaad rejaynayso,** laakiin dhammaan tallaabooyinka caadiga ah iyo go'aamada ku saamaynaya waxa loo baahan yahay in uu tuurta u rito masuulkaagu. Tusaale ahaan, masuulkaagu wuxuu ku matali doonaa marka la horjoogo booliska/ maxkamada ama wuxuu saxeexi doonaa dhokumantiyada rasmiga ah isagoo ku matalaya, tusaale hadii aad ka diwaangashan tahay dugsi ama aad dhakhar gasho.

# Maxay ka dhigan tahay inaad ku nolaato Xarunta Qoysaska iyo Carruurta?

Xarumahani waxay ku yaalaan guud ahaan Slovakia, hal xarun oo ku taala magaalada Medzilaborce taasoo takhasus u leh daryeelida carruurta aan ahayn Slovak. Shaqaalaha xaruntaa joogaa way ku xanaanayn doonaan oo waxay ku siin doonaan wax kasta oo aad u baahan tahay, sida cuntada, dharka iyo daryeelka caafimaadka, wakhti kasta oo aad u baahato. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad dhigato koorasyo la xidhiidha luuqadda Slovak iyo dugsiba inta aad xarunta joogto. Waa xarun furan, oo dhammaan dhaqaaqyadu waxay u baahan yihiin in lagala hadlo shaqaalaha bulshada. Si kastaba ha ahaate, markaad gasho Xarunta waxaad u baaha tahay inaad dhammaystirto karantiilka caafimaadka kaasoo laga yaabo in uu qaato hal bil. **Waxaad la xidhiidhi kartaa qoyskaaga haddii aad rabto.** Xarunta Qoysaska iyo Carruurtu waxay ku faraxsan yihiin inay ku caawin doonaan haddii aad sidaa yeesho oo aad su'aalaha ka jawaabto.

## Haddii aanan garanayn meel waalidkay jiro, qof ma iga caawin karaa inaan raadiyo?

Haa, **waad raadin kartaa qoyskaaga haddii ay kaa luntay halkii aad kala xidhiidhaysay,** oo aanad garanayn meel ay ku sugan yihiin. Si aad u hesho caawimo arrintan la xidhiidha, waxaad u sheegi kartaa shaqaalaha xarunta inaad doonayso inaad raadiso waalidkaa si aad u hesho, oo iyaguna waxay kaa caawin doonaan codsigaaga waxayna la socodsiin doonaan maamulka si loo raadiyo haddii ay suurogal tahay.

## Haddii aan garanayo halka ay joogaan xubno kamid ah qoyskaygu, qof ma iga caawin karaa si aan ula xidhiidho?

Haddii waalidkaaga, walaalahaaga waaweyn, eedooyiinkaa ama adeeradaa ay joogaan waddan kale, **waxa suurogal ah inaad la midawdo qoyskaaga.** Inta badan, nidaamka dib ula midoobista qoyska ayuu bilaabayaa masuulkaagu isagoo taageero ka helaya maamulka qaranka ee lagu magacaabo Xafiiska Laanta Socdaalka. Waxaad u baahan tahay inaad u sheegto masuulkaaga waxyaabaha aad u baahan tahay ee ku saabsan inaad rabto inaad dib ula midawdo qoyskaaga oo sii faahfaahinta la xidhiidha qoyskaaga sida magacyada, lambarada lagala xidhiidhayo iyo cinwaanada markaa wuxuu la xidhiidhi karaa maamulka isagoo ku matalaya. Nidaamku wuxuu qaadan karaa wakhti oo maaha mid loo dammaanad qaadayo dhammaan kiisaska dib ula midoobista qoyska; waxay ku xidhan tahay waxyaabo kala duwan sida badqabkaaga, xidhiidhka aad la leedahay xubnaha qoyska, iyo xaalada qoyskaaga. Xasuusnow inaad kala hadli karto masuulkaaga ama shaqaalahaaga bulshadha, xaaladaha qoyskaaga

# Waa maxay doorashooyinka aan ka helayo Slovakia?

**Hadii aad ka cabsanayso in lagugu celiyo dalkii aad kasoo jeeday** sababtoo waxaad la kulmi doontaa dhibaato dhinaca haybta, diinta, iyo halkaad kasoo jeedo, inaad ka tirsan tahay koox bulshada ka tirsan oo gaar ah, aragti siyaasi ah, **waaxad xaq u leedahay inaad codsato magangalyo doon ama daryeel ku meel gaadh ah (dočasné útočisko).** Masuulkaaga sharciga ahi wuxuu raadin doonaa codsiga magangalyo doonka isagoo ku matalay. Inta lagu jiro waraysiyada isagoo uu joogo masuulkaaga sharciga ah, waxa lagu weydiin doonaa su'aalo si loo fahmo cabsida aad qabto waxay tahay, iyo haddii aad dhib la kulmayso haddii lagu celiyo. Haddii aad marka horeba ku sugnayd Xarunta Qoysaska iyo Carruurta, waxa ku weydiin kara masuulkaaga ama shaqaalaha bulshada si aad ugu sharaxdo nidaamka.

---

Sidoo kale, xasuusnow waxaad **qoraal uga diri kartaa UNHCR** haddii aad u baahato caawimo iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan luuqadda aad doorbidayso " **svkbrprot@unhcr.org** " ama waxaad la xidhiidhi kartaa **Khadka caawinta UNHCR** kaasoo ku hadla Ingiriisi, Slovak, Ukreeniyaan iyo Ruush: **0800 22 12 30** (Khadka wicitaanka bilaashka ah, kasoo wac taleefan Slovak ah) **+421 2 22 11 56 50** (soo wac lambarka taleefanka aan ahayn Slovak)

## Macluumaad dheeraad ah:

**Nidaamka socda:**
https://help.unhcr.org/slovakia/asylum/

**Kaalmada carruurta:**
https://help.unhcr.org/slovakia/children/

**Taageerada laga helo ururada kale:**